

Ku xidhiidhi taleefankaaga Wi-Fi

Waa maxay Wi-Fi?

Wi-Fi waxa uu ku xidhiidhiyaa taleefankaaga (taleefanka ama taableetka) internetka bilaa xadhiga ah. Xidhiidhinta internetka bilaa xadhiga ahi waxa uu noqon karaa mid shacab ama gaar ah. Wuxuu aad isticmaali kartaa internetka Wi-Fi-ga shacab ee madaarada, maqaaxiyaha, iyo laybareeriyada.

Goorma ayay tahay in aan isticmaali Wi-Fi-ga shacabka?

Wi-Fi-ga wax ayuu kuu tarayaa hadii aad u baahan tahay inaad isticmaali internetka meel ka baxsan gurigaaga, laakiin aanad haysan anteenoo wanaagsan ama ayna kuugu jirin dhaatadu taleefankaaga. Tusaale ahaan, waxa aad i baahan tahay inaad ku xidhiidhiso Wi-Fi-ga hadii aad doonayso inaad soo dejisato app.

Marka aad ku xidhiidhinayso Wi-Fi-ga waxa aad arji doontaa astaanka dhakada shaashada aaladaada. Astaanka internetka:



Waa maxay Wi-Fi-ga gaarka loo leeyahay?

Wi-Fi-ga shacabku maaha mid gaar loo leeyahay. Ha **isticmaalin** Wi-Fi-ga shacabka si aad ugu gasho ama aad u wadaagto macluumaadka shakhsii ahaaneed, oo ay ku jiraan macluumaadka bangiga ama macluumaadka caafimaadka.

Wi-Fi-ga shacabka waxaa laga heli karaa meelaha madaarada, maqaaxiyaha, iyo laybareeriyada. Sidoo kale, wixii internetka Wi-Fi uma baahna baaswoodh marka kowaad ee aad galayso ka shacabka.

Daawo fiidyawayada si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaaato sirta:

Ingiriisi- <https://www.digitallearn.org/courses/internet-privacy>

Isbaanish - <https://www.digitallearn.org/courses/la-privacidad-en-internet>

Sidee ayaan ugu xidhiidhin karaa taleefankaya Wi-Fi?

- 1. Qabo 'buuxinta' (settings)**
- 2. Qabo 'Wi-Fi'**
- 3. Shid Wi-Fi** (aaladaada aya si toos ah u baadhi doonta internetka ay geli karto)
- 4. Dooro internetka aad doonayso inaad ku biirto**
- 5. Geli baaswoodhka, hadii loo baahdo.** Waxa aad u baahan tahay baaswoodh hadii intenetka uu leeyahay astaan sida: 

